# XARUNTA SHAQAALAHA WNYCOSH

# OGOW XAQUUQDAADA

### Mushaarka Ugu yar

**$16.00/saacadii**

Shaqaalaha beerta waxay leeyihiin mushaarka ugu yar oo ah $16.00/saacadii, oo ay la jirto “heshiiska shaqada beerta” ee go’aansada sida mushaarka loo helo iyo sharuudaha shaqada

### Jadwalka Mushaarka Ugu yar*

| Sanadka | Mushaarka Ugu yar/saacadii |
|---|---|
| 2025 | $15.50 |
| 2026 | $16.00 |

*Ka baxsan Caasimada New York

### Shaqaalaha La shaxaaday

- Mushaarka $10.70/saacadii iyo ugu yaraan $5.30 oo shaxaadka **AMA** badrooniga bixiyo
- Tirada shaxaadka la helay ama badrooniga bixiyay waxay la korodhaa mushaarka ugu yar
- Shaqaalaha la shaxaado waxay ku daboolanyihiin sharciyada waqtiga dheeraadjka ah
- Shaqaalaha helaa shaxaadka deeqsinimada **laga yaabo in shaxaadkooda la dalbaday ama la madadaaliyay** midkood *si toos ah ama aan toos aheyn* ee badrooniga ama matalaada shaqaalaha

### Xaquuqaha Shaqaalaha ku meelgaarka

*Shaqaalaha kumeelgaarka waxay xaq u leeyihiin:*

- Inay ka madaxbanaanaadaan takoorida **LABADABA** hay'ada ay isticmaalaan iyo badrooniga martigelinayo
- La siiyay tababarka badbaadada aqoonsiga ama ku haboon ee shaqaalaha aan ku meelgaarka aheyn cusub ee badrooniga
- Mushaarka ugu yar

### Xaquuqda Goobta shaqada Badbaadada iyo Caafimaadan

Waxaad xaq u leedahay sida waafaqsan sharciyada caafimaadka iyo badbaadada Mareykanka ee:

- In laguugu tababaro luuqad aad fahamtid
- Badbaadada goobta shaqada iyo xor ka ah halisaha la aqoonsaday
- La sheegida walaacyada caafimaadka iyo badbaadada kormeerahaaga
- Ku xareynta cabashada OSHA ee ku saabsan xaaladaha aan badbaadada aheyn ama aan caafimaadka aheyn
- Diidid inaad shaqo sameysid ee si macquul ah aad ugu maleyso inay ku geliso halis dhow
- Ogow wax ku saabsan halisaha goobtaada shaqo
- Ma ahan in lagu takooro (ceyrinta, siinta shaqada xun, iwm.) oo wargelinta halisaha badbaadada (Illaalada Ogeysiinta sharci darada)
- Gelitaanka diiwaanada baaritaanada caafimaadka iyo baaritaanada kormeerta jawiga shaqadaada oo qalabyada halisaha ah
- Gelitaanka warbixinta ku saabsan dhaawacyada iyo jirooyinka ka dhaco goobtaada shaqada



2495 Main Street • Suite 438 • Buffalo, NY 14214 • WNYCOSH.ORG • (716) 833-5416

## Waqtiga dheeraadka ah

Shaqaalaha inta badan waxay u qalmaan 1 ½ jeer mushaarkaaga joogtada ah ee dhammaan saacadaha la shaqeeyay in ka badan 40 oo isbuuc gudahiis ah

Waxaa jiro ka dhaafid ka imaaneyso waqtiga dheeraadka ah ee:

- *Shaqaalaha Beerta*
- *Shaqaalaha Fullinta:* kuwa kireysan/ceyrin karo iyo kuwa sida joogtada ah ugu aadiyo shaqada shaqaalaha labada ama ka badan
- *Shaqaalaha Xirfadlaha:* kuwa leh shahaadada 4-sanno ama shaqadooda hal abuurka leh
- *Shaqaalaha Maamulka:* kuwa ku dhaqmo iqtiyaarka iyo xukunka madax banaanida ama inta badan leh xafiiska/ shaqada goobta aan gacanta aheyn oo sida tooska ula xiriirto xeerarka maamulida

## Inta jeer ee Lacag bixinta

Inta badan shaqaalaha waa in lagu siiyaa shaqadooda 7 maalmood gudahood ee muddada la helay

## Xaquuqda Xor looga ahaanayo Takoorida

Ciwaanka VII iyo Qeybta Xaquuqul Insaanka Gobolka New York wuxuu ka illaaliyaa shaqaalaha in la takooro.

## Kooxyada Ka illaalsan Takoorida

- Jinsiyada
- Midibka
- Asalka Dhalashada
- Diin
- Jinsiga
- Curyaannimada
- Dooqa Galmada
- Heerka Milatariga
- Masuul ka noqoshada Sifooyinka Hiddaha
- Heerka Qoyska
- Heerka Guurka
- Heerka Dhibanaha Xadgudubka Qoyska
- Uurka
- Howlaha Siyaasada (ka baxsan shaqada)
- Howlaha Madadaalada (ka baxsan shaqada)
- Xubinnimada Midowga

## Illaalada Ogeysiinta sharci darada

Waa sharci daro in la ciqaabo ama loo ceyriyo shaqaalaha sameynta ama xareynta cabasho oo hay'ad walboo dowlada ah

Badrooniga **kum ma** ciqaabi karo shaqaalaha ku soo wargelinta badrooniga hay'ada dowlada oo aaminaad wanaagsan

*Badrooniga wuxuu masuul ka yahay ka aargoosiga:*

- Ceyrinta/shaqo ka fariisiga
- Liis madoobeynta
- Darajo ridida
- Diidmada Waqtiga dheeraadka ah/Dalacsiinta
- Ku guuldareysiga inuu kireysto/dib u kireysto
- Cabsi gelinta
- Hanjabaado sameynta
- Yareynta Lacag bixinta
- Yareynta Saacadaha
- Edbinta
- Diidmada faa'idooyinka
- Dib u xilsaarida saameyneyso filashooyinka dalacsiinta

## Xaquuqda Magdhowga Shaqaalaha

**Haddii aad ku dhaawacantid shaqada:**

- Waxaad u qalantaa caymiska magdhowga shaqaalaha, xittaa haddii lagugu "siiyo buuggaagta''ama "sida waafaqsan jadwalka"
- Waa inaad buuxisaa sheegashada Shaqaalaha ama foomka C-3 illaa badroonigaaga ama aad ka heli kartid caawin Qadka Xarunta Shaqaalaha WNYCOSH ee **(716) 206-3550**